

DAAWADAADA: Amlodipine _____mg

Maxaan u qaadanayaa daawadan? Waxaad leedahay dhiigkar. Dhiigkarku waa halis hadaan la daawayn. Wuxuu sababi karaa faalig iyo xanuunada wadnaha. Waxaad u dhiman kartaa dhiig kar aan la daawayn.

Qaado 1 kiniin aroor kasta intaanad waxkale cunin. Ma qaadan kartid wax cuno ah kahor intaanad liqin kiniinka.

Maxaan dareemi doonaa marka aan qaato daawadan? Mararka qaar waxa jiri karta saamayn dabe oo kaaga timaada daawada. Saamaynta dambe waa shay aad dareemi karto inay iska caadi tahay. daawadan saamaynteeda waxa kamid ah dawakhaad, madax xanuun, barar ku dhaca lugaha/kuraankuraha.

Kuwani maaha saamaynta caadiga ah inta badan lakin waxay u dhici karaan si dhaw waxay noqon karaan kuwa halisa ah. **Wac 911 ama aad qolka gargaarka degdega ah isla markiiba haddii aad isku aragto: yalaalugo/matag aan joogsanayn, kaadi cas, ama calool xanuun/uurkujirta oo ku xanuunta; finan, barar wejiga, dibnaha, carrabka ama cunaha ama dhibaato neefsashada; laab xanuun ama astaamaha wadno xanuunka oo ay ku jiraan xabadka/daanka/cududda gacanta bidix, neefta oo ku qabata, ama dhidid aan caadi ahayn.**

Maxaa kale oo aan u baahanahay inaan ogaado?

1. Waa inaad qaadataa daawadan maalin kasta xataa hadii aad caadi daremayso.
2. Waa inaad soo biirsataa daawadan bil kasta.
3. Haddii aad booqato xafiiska dhakhtarka, shaybaadh caafimaad ama qolka gargaarka degdega ah, waa inaad u sheegtaa inaad dhiig kar qabto oo aad qaadanayso Amlodipine.

“Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su’aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn.”